

Tallaallada feyruska korona

Tallaallada feyruska korona si wanaagsan ayay uga socdaan dhammaan magaalooyinka oo dhan.

Macaamiisha ka tirsan xarunta caafimaadka shaqaalaha ee heshiiska gaarka ah ka samaysay arrimaha tallaalka, waa in qofka macmiilka ka ah uu ugu horreynta xaruntaas uu ka tirsan yahay kala xiriiro arrimaha tallaalka.

[\(halkaan ka hubi goobaha tallaalka ee xarumaha daryeelka caafimaadka iyo arrimaha bulshada\)](#)

[\(halkaan ka hubi goobaha tallaalka ee shaqaalaha daryeelka caafimaadka shaqaalaha\)](#)

Tallaalku waxaa uu ka kooban yahay laba qaybood, kaasoo qaybta labaad qofka la siinaayo 6 toddobaad marka ay ka soo wareegto qaadashada tallaalka koowaad kaddib. Waxaa wanaagsan oo talo ahaan loo soo jeedinayaa in isku hal meel u qofku ka qaato labada tallaalka.

Waxaan talo ahaan u soo jeedinaynaa in ballanka laga qabsado dhanka elektorooniga, iyadoo loo maraayo linkiyada hoos ku qoran. Haddii qofka muwaadinka ah ay saaran tahay diidmada xagga amniga la xiriirta ee nidaamka macluumaadka diiwaangelinta ah, looma samayn karo wax ballan qabsasho ah oo dhanka elektorooniga ama nidaamka dano dhammaysiga ee eAsiointi. Tallaalku waa mid ikhtiyaari ah, oo lacag la'aan ama bilaash ah.

Waa suurtaggal in ka wakiil ahaan ballan loo qabto dadka waayeelka ah, iyadoo loo maraayo dhanka nidaamka cinwaankiisu yahay [puolesta-asiinnin](#). Qofka ehelka ah sidoo kale wuxuu qofka waayeelka ah ka caawin karaa ballan qabsashada dhanka elektorooniga ah. Sidoo kale waxaad ballanka ka qabsan kartaa, adigoo wacaaya xaruntaada daryeelka caafimaadka iyo arrimaha bulshada.

Isu diyaarinta tallaalka qaadashada

Ha imaan tallaalka haddii ay qandho ama xummad ku hayso, ama aad isku aragtao wax astaamo ah oo la xiriira dhanka hawomareenka ama caloon-xanuun. Haddii arrimahaas dhacaan iska baaji ama kansal ballanka. Tallaalka waxaa qofka looga mudayaa qaybta kore ee cududda, sidaa darteed waxaad soo xirataa maro ay fududahay in aad bannayso cududda qaybteeda kore. Waxaad hore u soo qaadataa aqoonsigaaga shakhsiyadeed (leysinka ama batantaha gaariga, amaba waxaad soo qaadan kartaa kaarka caafimaadka ee Kela-kortiga). Si looga fogaato ciriiriga iyo dadka badan ee hal meel isugu imaanaaya, waxaa muhiim ah in goobta sugitaanka tallaalka aan waqti aad u horreeya la imaan. Waxaad isku soo beegtaa waqtiga lagu qabtay. Tallaalka kaddib muddo 15 daqiiqo ah ayaa lala soconayaa xaaladda qofka, laakiin haddii ay jirto in waqti hore tallaallada qaarkood ama daawooyinka markii lagu siiyay kaddib lagugu arkay falcelinta dhanka xasaasiyadda ah, waxaa xaaladda la socodka ay noqonaysaa muddo 30 daqiiqo ah. Arrimahaan ku soo talaggal jadwalkaaga. Macmiilka isagu ma dooran karo tallaalka la isticmaalaayo, sidoo kale dhakhtarku ma amri karo in tallaalka kale loogu beddelo. Waxa kaliya oo arrinkaa laga soo reebay, waa haddii ay jirto in uu qofku xasaasiyad aad u daran ku qabo mid ka mid ah maaddooyinka noocyada tallaalka.

Linkiyada laga qabsan karo waqtiga ballanka halkaan ayaad ka heleysaa: pajjat-sote.fi/ajanvaraus-ja-tietoa-koronarokotuksista

Baajinta ballanka ama dib u dhigistiisa

Haddii aadan waqtiga tallaalka imaan karin, waxaa muhiim ah in aad iska baajiso ama kansasho. Ballanka qaabka elegtoroonig ahaanta loo qabsaday, waxaa lagu kansali karaa qaab elegtoroonig ahaan ah. Haddii ballanka loo qabsaday qaab elegtoroonig ah oo lagu kansalo ama lagu baajiyo dhanka telefoonka, waqtigii la baajiyay wali sidiisii ayuu uga sii muuqanayaa dhanka nidaamka elegtoroniga ah. Ballanka laga qabsaday dhanka telefoonka, waxaa lagu kansali ama baajin karaa oo kaliya dhanka telefoon ahaanta. Tallaalka qaybta labaad ee xoojinta ee ay kalkaalisada caafimaadku kaaga samaysay xarunta tallaalka, waxaa lagu kansali karaa ama dib loogu dhigi karaa oo kaliya dhanka telefoon ahaanta.

Dib u dhigsta ballanka: marka ugu horraysa waxaad iska kansashaa ama baajisaa waqtigii kuu ballansanaa, dabadeedna waxaad qabsataa ballanka cusub.

Ammaanka tallaallada

Tallaallada haatan la isticmaalo waa kuwo la ogyahay in ay si aad u xoog badan uga hortagayaan astaamaha feyruska korona, gaar ahaanna noocyada cudurka ee aadka u daran. Illaa iyo haatan waxaan wax badan laga ogayn oo macluudmad yar laga haystaa, illaa iyo xadka ay tallaalladu si fiican uga hortagi karaan qaadista cudurka iyo faafistiisaba. Sababtaas awgeed ayaa talooyinka la soo jeediyay ee looga hortagaayo faafista feyruska, ayay si isku mid ah ugu wajahan yihiin dadka tallaalka qaatay iyo kuwa aan wali la tallaalinba.